



## Mga Ujeedooyinka Koonsada

Sharraxaada muhiimada  
doorka Shaqaalaha  
Munaasabadda ee sugida  
nabada xiliga  
munaasabadda

Soo koobidda waxa laga  
filayo doorka Shaqaalaha  
Munaasabadda kahor  
munaasabadda, marka  
lagu gudo jiyu iyo kadib

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeega Xiriirka Bulshada

# Shaqaalaha Munaasabada

## Sugida Nabada Dadka Xiliga Munaasabada

*Koonsada tababarka ee Shaqaalaha Munaasabadda Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeega Xiriirka Bulshada, ee Sugidda Nabadda Dadka Xilliga Munaasabadda, ay dhigaan khubaro ayaa waxaa loogu talagalay in la baro shaqaalaha munaasabadda doorkooda shaqo iyo masuuliyadooda inay nabada dadka sugaan xilliga munaasabadaha bulshada.*

Mararka qaar, bulshooyinku waxay la kulmaan xiisado ay sababaan duwanaashahooda jinsiyadda, midabka, sinjiga, sinjiga ay isku tiriyaan, diinta, iyo naafonimada, isku-dhacaana waxaa lagu arki karaa dibad-baxayo. Markey tan dhacdo, xubnaha bulshada ee loo tababaray Shaqaalanimada Munaasabadda ayaa badanaaba waxay yihiin kuwa ugu mudan inay lasoo xiriiraan ka qeybgalayaasha. Isticmaalka Shaqaalaha Munaasabadda waa qeyb muhiim ka ah dhowrida nabadda munaasabadda bulshada. Tababarkaan waxuu bixiyaa sida ugu fiican ay Shaqaalaha Munaasabadda uga soo bixi karaan masuuliyadooda.

### Dulmarka Guud ee Barnaamijka



Marka isku-dhac ka imaado bulshooyinka oo ay keentay kala duwanaanta jinsiga, midabka, jinsiyada, sinjiga, sinjiga isku tiriyo qofka, diinta iyo naafanimada, waxaa dhici kara dibad-bax dadweyne, oo CRS waxay hubisaa in tabarrucayaasha bulshada loo tababaro si wanaagsan oo ay ku sugaan nabadeynta munaasabadda.

#### Waa maxay Shaqaalaha

**Munaasabadda?** Casharkaan waxuu faahfaahiyaa tilmaamayaasha doorka Shaqaalaha Munaasabada, waxay sameeyaan, iyo waxay samaynin.

#### Waa kuma kuwa kale ee doorka muhiimka ah ka ciyaaraa?

Casharkan waxuu muujiyaa dadka kale ee doorka ka ciyaara munaasabadda, ay kamid yihiin Shaqaalaha iyo Qabanqaabiyayaasha Munaasabadda iyo doorkooda iyo masuuliyadooda.

#### Sideed iskugu diyaarineysaa

**munaasabadda?** Casharkaan waxuu wacyigelin ka bixiyaa howlaha ugu weyn ee Shaqaalaha Munaasabadda iyo khatarta la xiriirta qabanqaabada munaasabadda.

#### Maxay sameyneysaa xiliga

**munaasabadda?** Casharkan waxuu diiradda saaraa howlaha muhiimka ah ee Shaqaalaha Munaasabadda qeyb waliba eek amid ah munaasabadda markay socoto, ay kamid tahay diyaarinta, dibad baxa, isku imaadka, iyo kala furfurkeeda.

#### Sidee ayaad u sugaysaa

**nabadeynta shacaka?** Casharkan waxuu muujiyaa arrimo dhici kara ee saameynaya nabada shacabka waxuuna bixiyaa talooyin iyo qaabaha loola xiriira kaqeyb galayaasha iyo qaab u socodka nidaamka munaasabadda.

## Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

## Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

## Xagee ka Shaqeynaa ▼

**Xarunta CRS** 📍  
Washington, DC

**Xafiisyada Gobolada CRS** 📍

**New England**  
Boston, MA

**Waqooyi-bari**  
New York, NY

**Atlantiga-Dhexe**  
Philadelphia, PA

**Konfurbari**  
Atlanta, GA

**Galbeedka-dhexe**  
Chicago, IL

**Konfur-galbeed**  
Dallas, TX

**Dhexda**  
Kansas City, MO


**Buuraleyda**  
Denver, CO

**Galbeedka**  
Los Angeles, CA

**Waqooyi-galbeed**  
Seattle, WA

**Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada** 📍

Miami, FL   Houston, TX  
Detroit, MI   San Francisco, CA



## Naga hel, nagala soo xiriir ▼

[www.justice.gov/crs](http://www.justice.gov/crs)

 [facebook.com/DOJCRS/](https://www.facebook.com/DOJCRS/)

 [@DOJ\\_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)

 [askcrs@usdoj.gov](mailto:askcrs@usdoj.gov)

 202.305.2935

Wixii macluumaad barnaamijkan ee dheeri ah ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xiriir xafiiska CRS ee magaaladaada.  
<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>